# Maxey waaxda dhaqanka sameyn kartaa si ay u caawiyaan?

Te Korowai Whetū
Social Cohesion

Social Cohesion Guide for the Culture Sector

## Uga mid ahaanshaha dhinaca farshaxanka, warbaahinta, ciyaaraha

Qeybta dhaqanka waxaa ku jiro warbaahinta iyo farshaxanka, qeybta dhaqanka iyo dhaxalka, sida kooxaha shaashada, farshaxanka jiiladda iyo matxafka. Aragtida dadweynaha ee social cohesion, wadaagnimada iyo kala duwanaanshaha ayaa badanaa ku saleysan nuxurka ay soo saareen qeybta dhaqanka. Qeybtan ayaa ka ciyaarto door weyn dhisida social cohesion iyagoo u adeegsanaaya nuxurka muujinayo kala duwanaanshaha iyo saameynada kala duwan ee ku leedahay dadka kala duwan ee ku nool Aotearoa New Zealand. Ka sheekeyn sheekooyin heerar walba ah, laga bilaabo aflaanta illaa qoraalada aqbaaraha, waxay bixisaa qeyb muhiim u ah muujinta dhaqankeena kala duwan oo naga caawiyo inaan isku xirano.

Dhammaanteen waan kala duwannahay, laakiin waxaan rabnaa inaan isla socono, u dabaaldagno kala duwanaanshaheena oo aan ixtiraamno dadka kale markii aan qilaafno. Tani waa muhiim sababtoo ah ma ahan in qof walba uu dareemo inay noqon karaan cida ay yihiin ama aaminsanyihiin in codkooda la maqli doono.

Waxaan nahay wadan aad u kala duwan oo ganacsiyadeena ay u adeegayaan bulshooyin badan oo kala duwan. Waxaan u baahannahay inaan helno qaabab la isku dhageysto oo aan isku maqalno. Waxaan rabnaa inay naga go'naato inaan fahamno kala duwanaanshaheena iyo awoodaheena oo aan ka shaqeyno waxa na mideeya iyo waxa isku keyn soo dhaweeyo.

## Ka mid ahaanshaha
# – waxa ay u egtahay

Bulsho meesha dadka si fiican isku fahmaan, waan is naqaanaa, ogaano dariskeena, dareeno goob shaqo loo dhanyahay, oo carruurteena dareemaan inay ka qeyb yihiin bulshooyinkeena oo aan naqaano meesha loo aado caawin markii aan u baahannahay. Waxaan dareenaa inay noo suurtogaleyso inaan la hadalno dadka aan caadi ahaan ula hadlin, aan ka hadalno markii aan maqalno dad dhahayo waxyaabo takoorid ah, oo aan xor u nahay inaan la wadaagno cida aan nahay, halka aan ka nimid, iyo sida aan waxyaabaha u sameeyno. Markii ay dhibaato jirto qofna gadaal ugama tagno – oo qof walbaa lagu daro.

## Dhisida ka mid ahaansho badan (Kordhinta ka mid ahaanshaha)
# – waxa aad sameeyn kartid

**Marka, waxa aan ku sameeyn karno farshaxanka, warbaahinta iyo ciyaaraha, inaan caawino dad badan, shaqaalahooda, macaamiisha, rukunada, ka mid ahaanshaha, qaadashada kala duwanaanshaha, ka qeybqaadashada, aaminaada dadka kale, dareemida ku xirnaanta iyo ixtiraam?**

### Ka mid ahaanshaha, aaminaada dadka kale

- kordhinta ku darista dhijitaalka, oo ay ku jiraan waxbarashada ku saabsan halisaha iyo badqab ahaanshaha:
  – tixgelinta darbiyada lacag bixinta, rukunnimada la qiimo dhimay, websaydyada lagu qiimeeyay-eber ama boggaga waxbarashada iyo macluumaad xiisaha ee quseysopert caafimaadka dadweynaha.
- caqabadaha aragtiyada iyo si masuul ah looga qeybgalo sheekooyinka bulshooyinka
  – txigeli sida sheekada ku saabsan bulshada ay u badantahay inay helaan bulshada.
- u sahlida waxbarashada sare u qaadeyso aqoonta dhaqanka ee qeybta iyo caqabada aragtiyada iyo hab dhaqamada takoorida.

- taageero, shaqo, iyo barnaamijka wuxuu ka shaqeeyaa farshaxanka iyo hal abuurada sare u qaado fariimaha takoorida ka soo horjeedo.
- taageero, shaqo, iyo barnaamijka wuxuu ka shaqeeyaa in caqabada aragtiyada iyo caadooyinka bulshada lidka ku ah.
- illaaliso iyo suurtogeliso dhijitaal ahaan dhaxalka maqalka-muuqaalka ee muujiyaa caadooyinka bulshada la soo dhaafay, u ogolaanshaha cilmi baarayaasha, taxane sameeyayaasha iyo dadka reer New Zealand inay aqoonsadaan hormarka takoorida iyo caadooyinka dhaqanka.

## Qaadashada kala duwanaanshaha, dareemida ixtiraam

- ku dhiirogeliso dabeecado wanaagsan iyo hab dhaqano qiimeeyo tabarucaada kala duwanaanshaha:
  - aasaasto meelo ama howlo dhiirogeliyo ka mid ahaanshaha oo yareyso kali ahaanshaha.
- hubiso daboolida waaya aragnimada nolosha kala duwanaanshaha iyo kooxyada shacab weynaha ee dhammaan farshaxanka iyo warbaahinta:
  - ka qeybgeliso hogaamada bulshada ama ka qeybgelida dhacdooyinka bulshada ee sheekooyinka bulshada.

## Dareemida ku xirnaanta

- sameyso oo sare u qaado dhacdooyinka kala duwan ee farshaxaka iyo boosaska warbaahinta:
  - aasaasto barnaamijyada wacyigelinta bulshada ee laga yaabo inay ku jirto qabashada dhacdooyin bilaash ah ee farshaxanada iyo muusiga ama howlaha ee meelaha sida bandhigyada farshaxanka iyo matxafyada
  - bixiso kooxyada bulshada boosaska kulamada oo bilaash ah iyo aagaga usu imaanshaha bulshada iyo NGO-yada si ay ugu qabsadaan usu imaanshaha bulshada, hui iyo aqoon isweedaarsiga.
  - o tixgeli arrimaha ka qeybqaadashada ee qeybta dhaqanka. Tusaale ahaan, arrimaha matalaada aqoonsashada ee farshaxanada iyo warbaahinta iyo la xiriirida NGO-yada iyo kooxyada bulshada ee la shaqeeyo kooxyada aan matalaada laheyn si ay u bartaan sida loo kordhiyo ka qeybqaadashada.

- kala shaqeeyo ururada la shaqeeyo dhagoolayaasha iyo dadka ay ku adagtahay maqalka wax ku saabsan nuxurka farshaxanka iyo warbaahinta la xiriirto iyaga.
- keydinta, sharafeynta, iyo illaalinta taonga laga soo bilaabo waqtiga la soo dhaafay iyo hadda oo jiilasha mustaqbalka ah.
- waxbarasho wanaagsan ee la xiriirto awooda dhaqanka iyo fahamka.
- sameeyso oo sare u qaado dhacdooyinka kala duwan ee farshaxaka iyo booska warbaahinta:
  - aasaasto barnaamijyada wacyigelinta bulshada ee laga yaabo inay ku jirto qabashada dhacdooyin bilaash ah ee farshaxanada iyo muusiga ama howlaha ee meelaha sida bandhigyada farshaxanka iyo matxafyada
  - bixiso kooxyada bulshada boosaska kulamada oo bilaash ah iyo aagaga usu imaanshaha bulshada iyo NGO-yada si ay ugu qabsadaan usu imaanshaha bulshada, hui iyo aqoon isweedaarsiga.
- taageero, shaqo, iyo barnaamijka ka shaqeeyo muujinta bulshooyinka aan matalaada laheyn. Tusaale ahaan, [https://pantograph-punch.com/categories/pacific-arts-legacy-project](https://pantograph-punch.com/categories/pacific-arts-legacy-project)
- taageerida sheeko sheegida iyo muusiga bulshooyinka badan ee kala duwan iyo dhaqamada.
- illaalinta iyo u diyaarinta qoraalada maqalka-muuqaalka ee soo wargeliyaa waaya aragnimada nolosha kala duwanaanshaha iyo kooxyada dadweynaha iyada oo la adeegsanayo taariiqda New Zealand tan iyo horaantii 1900-yadii.
- u suurtogalelin taariikhyahanada, cilmi baarayaasha, taxane sameeyayaasha, soo saarayaasha tusmooyinka iyo dadka kale ee reer New Zealand inay ku xirmaan oo aqoonasadaan isku midka iyo kala duwanaanshaha caadooyinka bulshada sida ay ugu hormareen Aotearoa New Zealand.
  - Luuqada Shiineeska ee Aotearoa New Zealand – ayaa ah mashruuc socdo iyada oo la isticmaalayo luuqada lagu tilmaamayo arrimaha adag ee aqoonsiga dhaqanka ee gudaha bulshooyin kala duwan oo Shiineeska New Zealand. (Arag websaydka: Luuqadaha Shiineeska ee Aotearoa | Te Papa)
  - LGBTQIA+ Taariikhaha Aotearoa New Zealand: Kōrero takatāpui ki Aotearoa – ayaa sahmiyo sheeyada jinsiyada aan la garaneyn,

shaqooyinka farshaxanka, iyo sheekooyinka bandhigyada Te Papa oo waxay dabooshaa sheekooyinka qaniga ah ee bulshooyinka LGBTQIA+ Aotearoa New Zealand iyo aastaamaha (fiiri websaydka: LGBTQIA+ taariiqaha Aotearoa New Zealand | Te Papa).

  – Qaabeynta nafsadaheena: dharka, aqoonsiga iyo dhaqanka – waxay sahmisaa sheekooyinka tilmaamo saameynada, warshadaha, iyo qiyaasida faashinka New Zealand iyadoo loo marayo bandhigyada, muujinada iyo cilmi baarista.

- hubinta matalaad wanaagsan ee waaya aragnimada kala duwan iyo lahaanshaha bulshada ee sheekooyinka iyo taonga.
- sare u qaadida luuqada iyo kala duwanaanshaha dhaqanka iyada oo loo marayo dhexdhaxaadin kala duwan.

## ka qeybqaadashada

- kala hadal la taliyayaasha bulshada, hogaamada bulshada ama NGO-yada wax ku saabsan afkaaraha la xiriiro social cohesion sida ka qeyb ah mashaariicda qeybta bulshada.
- codso arjiyada maalgelinta ee hay'adaha dowladda si aad u maalgeliso mashruuca qeybta dhaqankaaga, COGS ama Hay'adda Baqtiyaa Nasiibka iyada oo loo marayo nidaamka maareynta deeqaha ama iyadoo loo marayo Barnaamijka Hormarinta Bulshada Hogaamiso.
- la dagaalanto caqabadaha ka qeybqaadashada qeybta dhaqanka:
  – aqoonsado tirada dadka aan la matalin iyo isu imaado inay la xiriiraan NGO-yada iyo kooxyada bulshada ee la shaqeeyo ama matalo kooxyadaas si ay u bartaan sida loo kordhiyo ka qeybqaadashada.
- isticmaal barnaamijyada farshaxanka sida gaariga lagu dhisayo xirfadaha la gudbin sida hogaaminta, wada shaqeynta kooxda, iyo awooda dhaqanka ee ay ka faa'ido karaan qeybaha kale. Tusaale ahaan, www.sistemaaotearoa.org.nz.
- NZ On Air ayaa taageerto kooxyada kala duwan oo bulshada ah, oo ay ku jiraan bulshada curyaanka ah, iyaga oo siinayo barnaamijyo, qoraalka muuqaalka iyo daboolida dhacdooyinka. Barnaamijyada maalgelinta diirada la saaray oo shaashada oo dhan, warbaahinta aqbaaraha, tusmada carruurta iyo qeybta muusiga waxay kordhisaa ka qeybqaadashada kooxyo kala duwan (sida Māori, dadka Jasiirada, dadka Aasiyaanka ah, dhalinyarada iyo dumarka).

- kordhi kala duwanaanshaha guddiyada maamulka ciyaaraha, iyo fursadaha looga qeybqaadanayo ciyaartoyda, tababarayaasha iyo maamulayaasha.
- siinta tusmada qorsheeyayaasha dhacdada, abaabulayaasha, fanaaniinta iyo dadka kale ee ku lugleh dhacdooyinka dhaqanka ee u suurtogeliyo ka qeybqaadashada.
- ugu tabarucida sida jaal ku jiro barnaamijka Tāhuhu (ee ku lugleh Archives NZ, Maktabada Qaranka iyo Dhawaqa iyo Aragtida Ngā Taonga) si sare loogu qaado howlaha kobciyo ka mid ahaanshaha iyo ka qeybqaadashada.
- fududeynta gelitaanka muuqaalka dambe ee bandhigyada farshaxanka iyo tusmada warbaahinta oo faraca, cilmi baarayaasha, bartayaasha, fanaaniinta, sameeyaayasha iyo xirfadlayaasha.
- ka jawaabida su'aalaha iyo codsiyada macluumaad ku saabsan sheeyada bandhigyada iyo mowduucyada xiisaha ee ka imaanayo dadweynaha.
- siinta isdhaxgal wanaagsan iyo boosas badqab ah ee loogu tallogalay bulshooyinka si ay uga qeybqaataan.
- hormarinta helitaanka bulshooyinka inay ka qeybgalaan bandhigyada arshaxanka iyo tusmada warbaahinta.

Te Korowai Whetū
Social Cohesion


6290SOC Oct 2022 – Culture sector – Somali